



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 28th Jannaayo 2025

Gacaliyayaal Qooyas,

Maadaama duufaanno badan ay u eg tahay in ay nagu soo fool leeyihiin, fadlan hubi in canuggaada uu soo xirto jaakat marka ay dugsiga imaanaayaan iyo marka ka rawaxaayaan maadaama aan annaga isku dayno inaan dibadda u saarno waqtiga biririfta iyo waqtiga qadada marka uu roobku khafiif yahay.

Usbuucaan waa kii ugu dambeeyey ee Mr B (LSA Fasalka 3) waxaan u rajeyneynaa wanaag asagoo ka tegaaya waxbarashada. Waxaan ku soo dhaweyneynaa shaqaalaha Miss Owen iyo Miss Dinnall.

Xilligu durbadiiba wuxuu ahaa mid mashquul badan, iyadoo la tixraacaayo booqashadii guusha lahayd ee Fasalka 4 ay ku tageen Sheku Kanneh-Mason Xilligii hore, Fasalka 5 waxay tageen Roman Baths meeshaas oo ay ku soo barten waxbarasho dheeri ah ee ku saabsan noloshii waqtigii Roman. Waxaan dhawreynaa dabbaaldega Maalinta Buugga Caalamiga ee sannadkaan akhbaar dheeri ah ayaa la idiin siin doonaa oo ku saabsan booqashooyinka lagu tagaayo Foyles bookshop, sheekooyinka sariirta iyo kuwo kale oo badan. Haddii aad dooneysid inaad caawinto usbuuca buugga adigoo sheeko ku sheegaaya luqad kale ama ku akhrinaaya sheeko luqad kale, waxaan jeclaan lahayn inaad noo timaadid aadna noo sheegtid. Waxaan ku riyaaqsannahay luqadaha badan ee laga isticmaalo dugsigeenna.

Mahadsanidin,
Mrs L-H

Nabadgelyada Internetka



Nabadgelyada internetka waxaa kaloo ku jira waqtiga ay carruurta ku jiraan internetka. Fadlan fiiri lifaaqa oo ku saabsan waqtiga lagu jiro internetka iyo sida loo maareeyo arrintaan si uu canuggaada uu waqti ugu helo wada-hadal weji-ka-weji ah oo aan ahayn shaashadda aaladaha

Rags to Riches

Aad ayaad ugu mahadsan tahay taageeradaada oo dhan ee arrintaan – waxaan helnay £58.95.



Taariikhaha Xusuus-Qorka

11^{da} Feb – Madasha Waalidiin/Daryeelayaasha Subaxa Qaxwada iyo booqashada Guddiga Akadeemiyada.
17^{ta}-21^{da} Feb – Fasaxa Xilligii, dugsi ma jiro.
6^{da} Maars – Maalinta Buugga Caalamiga, dabbaaldeg usbuuca oo dhan
17^{da} Maars – Maalin INSET day, dugsi uma jiro carruurta.
Dhammaadka Maars – Ciid, waxaan dhawreynaa inaan qorsheeyno Qadada Ciidda.

Imaanshaha



Celceliska imaanshaha dugsiga ee usbuucii hore wuxuu ahaa **92%**. **Yoolkeenna waa 96%**. Imaansho wanaagsan waxay carruurta siisaa fursadooyin badan ee la xiriira waxbarashooda, marka fadlan arrintaan caawi. Hambalyo **Fasalka 4** oo gaaray imaansho **98%** usbuucii hore – waxaad dhaafteen yoolkeennii ahaa 96%. Waxaa sigay yoolka in ay gaaraan **Fasalka 6** iyadoo keenay imaansho ah **95%**. Xusuusin in aan fileyno in carruurta dugsiga joogaan Xilliga waxbarashada. Haddii canug uu maqnaado iyadoo fasax la haaysanin 10 kulan (5 maalmood), waxaa dhici karta in ganaax (Fixed Penalty Notice) lagu soo diro. Fasax aan la oggolaan ma aha in uu ahaado mid hal mar ah oo waqti dheer laakiin wuxuu noqon karaa waqti kala go'go'an oo dheer.

Dr Paul Stephenson

Usbuucaan waxaan mar kale xusuusaneynaa Dr Paul Stephenson, OBE iyo dhammaan wixii u uku qaaraamay in Bristol ay noqoto bulsho simman ee dadka madow. Wuxuu ahaa u doodaha xuquuqda madaniga kaasoo si weyn loogu xasuusto hoggaamintii sii Cunaqabateyn Baska Bristol maxaa yeelay Bristol Omnibus Company wuxuu diidaayey in uu shaqaaleysiyo dadka madow iyo Aasiyaanka noqdaanna wadayaal ama hagayaal. Wuxuu ahaa sahmiye marka laga fiiiriyo dhinac walba, oo ay ku jirto inuu ahaa madowgii ugu horreeyey ee ka shaqeyaa arrimaha bulshada Bristol. Waxaa jira xaflad xusuusin oo ka dhici doonta Bristol Cathedral maalinta Jimcaha. Waxaan ku xasuusan doonaa kulannadeenna dugsiga usbuucaan.



Tan waxay la xiriirtaa qodobbadeenna, Ixtiraamka, Diyaar ahaanshaha, nabadda iyadoo Ixtiraamka uu yahay mid ka mid ah shan qiyamee British. Waxaan ka wada-hadleynay midab faquuqa dugsiga maadaama carruurta qaarkood la maqlay iyadoo isticmaalaaya luqad midabta koor. Ma aqbaleyno luqaddaan waxaanna carruurta xasuusaneynaa waqtiyada goobaab-fadhiga iyo kulannada luqadda dhaawicidda in ay saameyn ku yeelan karto kuwa kale iyo sida sharciga sinnaanta ay u tahay in aan dhammaanteen xurmeyno. Waxaan duntaan ku toli doonaa manhajkeenna, gaar ahaan PSHE iyo RE, iyo sidoo kale qaar ka mid ah buugaagta dugsiga lagu akhristo. Hase yeeshee, waan u riyaaqi lahayn haddii aad canuggaada arrintaan kala hadasho. Kan hoose waa websayt arrintaan kaa caawinaaya.

<https://www.nspcc.org.uk/keeping-children-safe/support-for-parents/children-race-racism-racial-bullying/>

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630

Cabot's core values are:

Partnership Inclusion Excellence